SOMALI

INQUEST

TRUTH, JUSTICE AND ACCOUNTABILITY

MACLUUMAAD LOOGU TALOGALO QOYSASKA LAGA DHINTAY DABKA GRENFELL TOWER

35 Sano ayay INQUEST waxay bixinaysay talo bixin lacag la'aan ah isla markaasna ay la socoto sir qarin oo ku saabsan dhimashada aan la garanayn waxa sababay taas oo la siinayo ehelka qofka, kooxaha bulshada, qareenada iyo dhinacyada tabarucaadda ku shaqeeya . Waxaan nahay koox oo si madax bannaan ah u shaqeysaa lamana shaqeyno xukuumadda. Taasi micneheedu tahay in aan si gaar ah u siin karno talo ku saabsan baaritaanada kala duwan oo ay jiraan hadda ku saabsan dabka Grenfell Tower.

Waxaan ku dadaali doonna in aan hubinno in habka sharciyeed oo ay jiraan in ay keenaan runta iyo cadaaladda oona in kuwo mas'uulka ah in la xisaabtamaan.

Buuggan yar ujeeddadiisu uu yahay in uu si deg deg ah u siiyo jawaabo ku saabsan su'aalaha aan maqlaynaa markii qoysaska weydiiyaan. Sidoo kalena waxaan idin talinnaa in aad **si ugu dhaqsaha badan uga heshid qareemo takhassus leh talo sharciyeed** si aad u ilaalisid xuquuqdiina. Waxaan idin caawin karnaa in aad heshid qareenka kugu habboon oo ah mid ka mid ah kooxdeena qareemada oo la dhaho INQUEST Lawyers Group. Si aad u heshid taas iyo talooyin kale, waxaad nagala xiriiri kartaa INQUEST:

Telfoon: 020 7263 1111
Iimayl: inquest@inquest.org.uk
Intarnetka: www.inquest.org.uk

Fiiro gaar: Waxaa jira adeeg taleefoon oo ah aalad oo duubto weydiimaha dadka haddii aan mashquul ku nahay wicitaamo kale; haddii aad mesaj duubtid waxaan idinku soo celin doonnaa.

Macluumad dheeraad oo faahfaahin ah waa lagu heli karaa buuggeena yar ee kooxda INQUEST. Browserkaaga intarnetka soo gal cinwaankan: bit.ly/InquestHandbook

Baaritaan dambiyaha miyaa la yeelan doonaa?
Booliiska magaalada London (Metropolitan Police) baaritaan dembiyaha ayuu furay ku saabsan xaaladaha masiibada. Waa surtagal in baaritaanka booliisku uu qaadan doonaa muddo dhowr bilood ah. Kaddibna waa la gudbin doonaa hay'adda Crown Prosecution Service si ay u qaato go'aan ku saabsan haddii qof ama urur dembiyo sameeyay oo ka yimaadeen musiibadan iyo in kale.

Booliisku miyuu fiirin doonaa eedeyn xagga dilid si kama' ah u sameeyay? Dembiyada oo la fiirinayo ay ku jiri doonaan dayacaad aan la aqbali karin, dilid qof ama dad si kama' ah u sameeyay ama dilid si kama' ah u sameeyay urur. Haddii booliisku ama hay'adda CPS ay qabaan in ay jiraan caddayn ku filan, maxkamad ayaa dhici doona sida caadiga ah. Haddii aysan qabin in ay jirto caddeyn ku filan, dhibbanayaashu xaq bay u lahaan doonaan in ay helaan dib u eegis go'aankaas.

Baaritaan dowladeed miyaa la yeelan doonaa?
Xukuumaddu baaritaan dowladeed oo buuxan ayay dhawaaqatay. Dhibbanayaasha iyo dadka ka badbaaday dabka xaq bay u lahaan doonaan in ay dhaqaale u helaan matalaad sharciyeed si ay u ciyaari karaan door ilaa xad ay doonayaan. Waxaa la siin doonaa fursad in ay ku qaabeeyaan eego baaritaan ee tixraaca.

Xog raadintan waxaa lagu dhagaysan doonaa caddeynta ku aaddan markhaati furka kasoo qayb galayaashuna waxay awoodi dooonaan in ay su'aalo ka keenaan caddeyntan. . Tani waxay suuragalinaysaa in la ogaado xog ku meelgaar ah taasoo, sida waxyaalaha kale noqonaysa habka ugu dhakhsaha badan ee lagu ilaalinayo dadka dhismayaasha kale dagan ee ay hasato dhibaatooyinka kuwan la midka ah ee wax dhisidda ku saabsan.

Dadka raba in ay door ka ciyaaraan waxay noqon karaan "kasoo qaybgalayaal buddhig ah". Kuwan waxaa ku jiri kara dad kasoo qaatay, ama laga . yaabo in ay, "kasoo ciyaareen door toos ah oo muhiim ah

arinta laga hadlayo iyo kuwo si "wayn u danaynaya".

Ka qaybgalayaasha bud-dhigga ah way dalban karaan in ay su'aalo waydiiyaan markhaatiyada; in ay gudiga xog'raadinta u gudbiyaan hadalkooda furitaanka ah iyo kan xirirtaanka ah iyo in ay helaan nuqul ka mid ah warbixinta xogta la raadinayo.|

Baaritaanku mid madaxbannaan ah miyuu noqon doonaa? Waxaan rajaynaynaa iyada oo ay jirto matalaad sharci oo xoogan oo ay helaan dadka ay saamaysay, xog waraysigu wuxuu wax ka qaban karaa dhibaatada dhibanayaasha iyo dadkii ka badbaaday maadaama uu yahay mid madax banaan iyo mid suuragalin kartta in la helo xog muhiim ah.

Haddii aad goor hore doondoontid matalaad sharciyeed waa laga yaabaa in codkiina la maqlin doonaa. Si aad u aragtid qoraalkeena buuxan oo yidhaahdo in aan soo dhoweyno baaritaan dowladeed, browserkaaga intarnetka ku soo gal cinwaankan: bit.ly/InquestHandbook

Muxuu yahay inquest ama baaritaan? Inquest waxay tahay baaritaan oo fiiriyo xaqiiqooyinka si loo ogaado qof yaa ahaa iyo meesha, goorma iyo sida uu dhintay. Waa hab sharciyeed oo guddoomiyo qof koroner ah oo la shaqeeyaa koox xeerbeerti ah mararka qaarkood.

Koronerta ee kiiskani waa Koronerta Sare Dhakhtaradda Fiona Wilson oo ka shaqeysa Maxkamadda Koronerka ee Galbeedka Hoose magaalada London. Sidoo kalena Koronertu waa in ay ka fekerto haddii ay surtagal tahay in laga hortagi karo dhimashada mustaqbalka. Waxayna talin kartaa in isbeddello la sameeyo. Maxkamadaha way furan yihiin waana yahay surtagal in la matali karo qoysaska.

Goormee inquest ayuu dhici doonaa? Markii mayd la helo oo la aqoonsado Koronertu inquest ayay furi doontaa. Sida caadiga ah waxaa jira maxkamad kooban

halkaas oo qof ku akhriyo maxkamad furan magaca, da'da, dhowr faahfaahin ku saabsan qofka dhintay iyo sababta hordhaca ah dhimashada. Waa surtagal in ay jiraan dhowr baaritaan furan isku mar. Kaddibna Koronertu waxay hakin doontaa inquestka si baaritaanka dembiyeed iyo baaritaanka dowladeed u dhici karaan. Baaritaamahaasi waa in ay dhacaan mar hore.

Marka baaritaanka dembiyada iyo baaritaanka dowladeed ay dhammaystirmaan Koronertu way go'aamin doontaa in loo baahan inquestka, waana in dib loo bilaabo.

Sidee baan u sheegaa booliiska in qof la waayay? Su'aalo ku saabsan qaraabo la waayay waa in la weydiiyo Xafiiska Dhaawacyada iyo Khasaaraha ama Casualty Bureau ee Booliiska Metropolitanka . Waa in aad tegtid Xarunta Isboortiga ee Westway (Westway Sports Centre) oo ku taal galbeedka London ama ku soo wac Casualty Bureau 0800 0961 233.

Haddii aad u sheegtay booliiska in qof la waayay kaddibna waad heshay qofkaas waa in aad u sheegtid Casualty Bureau.

Waxaa looga sheegi doonaa Koronerta dhimashooyinka dhammaantood oo keenay dabka Grenfell Tower. Markii aqoonsiga la sameeyay saraakiisha xiriirka qoysaska way la soo xiriiri doonaan qofka ugu dhow qofka dhintay ama qaraabadiis/qaraabadeed. Haddii aan idinla xiriirin kaddib markii aad u sheegtay booliska in qof la waayay, waa surtagal in sababta ay tahay adeygga in la helo oo la aqoonsado dadka dhinteen. Waxaan fahamsannahay in taasi ay tahay wax uu keeno welwel iyo saxaariir badan maalin kasta oo soo marto. Kooxda INQUEST waxay la xiriiraysaa Maxkamadda Koronerta iyo Casualty Bureau oona way idinku caawin kartaa arrintaas.

Yaa u leh mas'uuliyadda maydka qaraabadayda?
Waqtiga baaritaamo kala duwan la sameynayo, Koronerta ayaa gacanta ku haya maydka aanna loo sii dayn karin aaska iyadoo aan siinin oggolaansho.

Weydiimo ku saabsan sii daynta maydka iyo qalliinka baaro dhimashada ka dib waa la weydiin karaa **xafiiska Koronerta**. Nambarka waa **020 7802 4750**, laakiin in muddo ah weydiimo waa in lagu weydiiyo Casualty Bureau kor ku xusan.

Miyaan joojin karaa qalliinka baarista dhimashada in la fuliyo? Guud ahaan qalliinmahan si degdeg ah ayaa loo fuliyaa. Waxaad u sheegaysaa Koronerta sida ugu dhakhsaha badan haddii aad ka soo horjeeddo qalliin baarista dhimashada si xal kale looga fekri karo. Haddii Koronertu go'aansato in qalliinka aan loo baahan waxay sii dayn kartaa maydka qalliin la'aan.

Maydka miyaan arki karaa? Guud ahan haa. Taas waa lagu habbeeyaa xafiiska Koronerta. Xaaladaha qaarkood, tusaale ahaan marka uu jiro dhaawac aad u daran oo jirka so gaaray, sargaalka howshaas qaabilsan waxaa laga yaabaa in uu soo jeediyo in qoysku uusan arkin jirka ama la xadido qaabka jirka loo arkayo (tusaale ahaan in muraayad gadaasheeda laga tuso). In aad taladaas qaadato iyo in kale adiga ayay ku jirtaa. Waxaad raadsan kartaa talo bixin sharci haddii aad dareento in laguu diidanyahay aragtida jirka qofka qaraabadaada ah.

Yaa aqoonsanaya maydka? Xubin qoyska ka mid ah ama qof saaxiib ah ayaa jirka aqoonsan kara markuu arko laakiin haddii ay sidaasu suuragal noqon waydo waxaa la isticmaali doonaa hab kale sida faraha oo la qaaado ama baadhitaan lagu sameeyo kaydkii qoraalada dawaynta ilkaha ama tijaabooyin laga qaado hidda sidaha DNA.

Sargaalka qaabilsan baadhista jirka dhaqamada iyo caqiidooyinka la xiriira maydka ? Waa muhiim in la ogaysiiyo saragalka baadhista qaabilsan dhaqanka iyo waxyaalaha aad aaminsantihiin si ay qaab sharci ah uga taxadaraan dareenkiina.

Goormaan samayn karnaa agaasimidda duugista maydka? Duugista maydka ma dhici karto ilaa sargaalka qaabilsan baadhista maydka uu ogalaado in la fasaxo jirka, laakiin waxaa idin caawin karta in aad la xiriirtaan agaasimaha xabaasha ee aad doontaan xilli hore kaas oo idin siin kara caawin farsamo oo la xiriirta agaasimidda xabaasha. . Waa in aad haysataan risiidada oo dhan haddii ay dhacdo in kharashaadka dib loo soo dalacdo. Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ku saabsan diyaarinta aaska halkan:
https://www.gov.uk/after-a-death/arrange-the-funeral

Shahaado dhimashada miyaan u baahanahay?
Shahaadada dhimashadu waa dikuminti sharci ah oo loo diro Diiwaangaliyaha dhalashada iyo dhimashada, taas oo lagu qoro macluumaadka qofka dhintay iyo sababta uu u dhintay. Saragaalka qaabilsan baadhista maydka ayaa wuxuu idin siin doonaa shahaado ku meelgaar ah marka jirka la aqoonsado loona fasaxo in la xabaalo. Tan waxaad uga baahan kartaa hanaanka la maro marka dhimasho dhacdo sida xirista akoonada bangiga, wargalinta ajansiyadii uu la tacaamuli jiray, helista canshuurta dhaxalka iwm.

Ka warran baahiyaha qoyskayga isla markiiba xagga guriyeynta iyo taageero kale.
Waxaan la soconaa in ururro badan ay rabaan in ay caawiyaan. Xarunta Sharciga ee North Kensington waxay isku dayaysaa in ay isku dubba riddo talooyinkan si aad u hesho tala bixinta aad u baahantahay ee ku aaddan baahiyaha guryaynta, xaaladda daganaanshaha wadanka, mucaawanooyinka taakulaynta, ama baahiyaha dhaqaale ee dagdagga ah ee qoyskaagu qabo. **La xiriir: North Kensington Law Centre:** Unit 15, Baseline Studios, Whitchurch Rd, London W11 4AT. Soo wac 020 8969 7473 ama booqo www.nklc.co.uk.

Maxaa dhici doona hadda kaddib?
Baaritaanka dowladeed iyo baaritaamaha dembiyada muddo dheer bay qaadan doonaan in ay dhammaystiraan. Habkani wuxuu noqon karaa mid istarees leh ooo wareer badan laakiin waxaan diyaar u nahay in aan talo iyo taageero bixino.

SI AAD U HESHID TALO & CAAWIMAAD KU SAABSAN HELISTA MATALAAD SHARCIYEED NAGALA SOO XIRIIR **I N Q U E S T : TELFOON 020 7263 1111**